

**Xeerka lamba. 153 rep.**

**Samaynta kaalimaha shaqaalaha rayidka Soomaaliya**

## **Maamulka Wasaayadda Soomaaliya Talyaaniga**

### **Maamulaha**

Marka uu arkay Dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 9 Disembar 1952 lamba. 2357;

Marka uu arkay Amarka 5 Abriil 1954, lamba. 9;

Marka uu garaowsaday in ay waajajib tahay in maqaam loo sameeyo shaqaalaha rayidka ee soomaaliya iyo in la jideeyo xeerarka gaarka qaar iyaga ka mida;

Marka uu dhagaystay Guddiga Maamulka;

### **Wuxuu dekereeto ku soo saarayaa**

#### **Qod. 1**

Shaqaalaha Rayidka ee soomaalida AFIS ee ku xusan Nidaamka lamba. 9 ee loo qaybiyay kaalimaha hawlaha maamulka, kaalimaha garsoorka, kaalimaha dugsiyada, kaalimaha farsamada shaqaalaha hoose sida ku xusan lifaaqa Dekereetadaan.

Shaqaalaha kaalimaha u xilsaaran hawlaha maamulka caadiyan waxaa loogu talagalay in ay socodsiiyaan hawlaha la soo sheegay, ha ahaadeen kuwa xarunta ama meel ka baxsan, sidoo kale halkii looga baahdo socodsiinta shaqa kasta ee Maamulka.

#### **Qod. 2**

Marka laga reebo marka si ka duwan loo sheego qaybaha shaqaalaha rayidka soomaalida AFIS, waxay noqonayaan sida soo socota;

- a) Shaqaalaha qaybta A, wixii ku saabsan muddo xil-waayeenimada illaa darajada 5, arrimaha la xariira imtixaanka darajada 5 illaa 4 iyo wixii ku saabsan muddada xil-waayeenimada shaqada ee u dhigma darajooyinka sare;
- b) Shaqaalaha Qaybta B, wixii ku saabsan muddada xil-waayeenimada shaqada illaa darajada 7, arrimaha la xariira imtixaanka darajada 7 illaa 6, wixii la xariira imtixaanka darajada 9 illaa 8, iyo muddada xil-haynta shaqada ee u dhiganta darajooyinka sare;
- c) Shaqaalaha qaybta C, wixii la xariira muddada xil-waayeenimada illaa darajada 9, wixii ku saabsan laga bilaabo darajada 8 iyo wixii mudnaan u dhigma darajada sare.
- d) Shaqaalaha qaybta D, arrimaha ku saabsan muddada xil-waayeenimada shaqada illaa darajada 12 iyo wixii u dhigma ee la xariira mudnaanta u dhiganta darajooyinka sare.

#### **Qod. 3**

Si looga qaybgalo tartanka oggolaashaha darajada bilowga ee (9) shaqaalaha kaalinta garsorayaasha, waxaa ku filan shahaadada waxbarashada shaqaalaha ee ku xusan qaybta B; shaqaalaha sidaas lagu qoray ma heli karo wax ka baxsan dallaacaadda darajada. Waxaa loo jidayn karaa kaalinta garsoorayaasha tartamo si toosa loo qoro shaqaalaha darajada 7, si ay uga

qaybqaataan tartamadaas hasayeeshe waxaa looga baahanyahay in ay haystaan shahaadada waxbarashada loo jideeyay shaqaalaha A.

#### **Qod. 4**

Marka laga reebo arrimaha ku xusan qodobka 3 ee la soo aheegay dallacaadaha shaqaalaha ka tirsan kaalinta garsoorayaasha waxay u dhacayaan sida soo socota:

- a) wixii ku saabsan shaqaalaha sida tooska tartanka lagu qoray darajada 7; wixii ku saabsan sida lagu sheegay xarfka a) ee qod.2 ee xagga sare;
- b) wixii ku saabsan shaqaalaha sida tooska lagu qaatay tartanka darajada 9 sida ku xusan xarfka b) ee qod. 2 ee xagga sare.

#### **Qod. 5**

Tartamada lagu galayo caawiyeyaasha barayaasha xitaa waxaa ka qaybgeli kara kuwa wax ka soo dhigay dugsiyada hoose ugu yaraan 5 sano oo isku xigta, haddii saddexdii sano ee ugu dambaysay laga keenay warbixin wanaagsan, ugu yaraanna ay ka mira dhaliyeen daraasadda, muddadii lagu jiray fasaxa sanadlaha saddex koorso ee dib u cusboonaysiinta.

#### **Qod. 6**

Tartamada lagu galayo kaalinta kal-kaaliyaha xannaanada xoolaha waxaa ka qaybgalaya xitaa kuwa soo shaqeeyay ugu yaraan shan sano oo isku xigta oo soo qabtay hawlo loo bogay oo isku xiga sida kal-kaaliyaha xannaanada xoolaha, bulshada ama umulisooyinka. Si loo kasbado dallaacaadda darajada 10aad ee kaalimaha la soo soo sheegay waxaa la iska doonayaa in uu haysto shahaado xirfadeed ee kalkaaliyaha xannaanada xoolaha.

#### **Qod. 7**

Koorsooyinka gelitaanka doorka gargaarka caafimaadka way awoodaan idoo kale kala qaybqaataan shaqaalaha caafimaadka ama bulshada iyo umulisooyinka laba sano oo adeeg joogto ah in ka yar “wanaagsan”

#### **Qod. 8**

Si looga qaybgalo tartamada lagu galayo darajada bilowqga ah ee (15aad) ee kaalinta kalkaaliyaha caafimaadka ama bulshada ee daaweeyeyaasha waxaa ku filan, shahaadada waxbarashada ee laga doonayo shaqaalaha D; shaqaalaha sidaas lagu qaatay ma heli karaan dallaacad dhaafsan dharajada 14aad haddii aanay haysan shahaada xirfadeed ee kalkaaliyeyaasha iyo dallaacaad dhaafsan darajada 9aad shahaado xirfadeed ee kalkaaliyaasha caafimaadka ama bulshada. Kaalinta lagu soo sheegay qodobkaan waxaa loo oggoolaan karaa xitaa si toosa shaqaalaha darajada 11aad, si ay uga qayb qaataan tartamadaas, hasayeeshe waxaa laga doonayaa in ay haystaan shahaadada waxbarashada laga rabo shaqaalaha qaybta C ama mid xirfadeed ee umulisanimo, shahaado xirfadeed ee daaweeyeyaasha oo laba sano oo isku xigta soo shaqeeyay, lagana keenay warbixin loo bogay. Xitaa xaaladaha ku xusan faqradda kore si lagu helo dallaacaadda darajada 10aad waxaa la iska doonayaa in la haysto shahaado xirfadeed ee kalkaaliyanimada caafimaadka ama bulshada;

### Qod. 9

- a) Marka laga soo tago arrimaha lagu soo sheegay qod. 8 ee xagga sare dallaacadda shaqaalaha ka tirsan kaalimaha kalkaaliyeyaasha caafimaadka iyo daaweeyeyaasha, sida soo socota ayay noqonayaan:  
wixii ku saabsan kalkaaliyeyaasha caafimaadka ama bulshada sida ku xusan xarafka C ee qod. 2 ee xagga sare:
- b) wixii ku saabsan daaweeyeyaasha sida ku xusqan xarafka D ee qod. 2 ee xagga sare.

### Qod. 10

Tartamada lagu galayo kaalinta umulisanimada waxaa ka qaybgali kara xitaa kalkaaliyeyaasha caafimaadka ama bulshada sidoo kale daaweeyeyaasha si joogta ku soo shaqeeyay laba sano oo isku xigta kaalintaas, marka laga keeno warbixin loo bogay. Si loo helo dallacadda darajada 10aad kaalinta la soo sheegay, waxaa la iska doonayaa in la haysto shahaado xirfadnimada umulisanimada.

### Qod. 11

Ka maarmidda ku saabsan waxbarashada ku xusan qod. 33 ee Amarka 5 Abriil 1954, lamba. 9, waxaa lagu dabbaqi karaa xitaa xaaladaha ku xusan qod. ee xagga sare.

Muqdisho, 27 Nofembar 1954.

Maamulaha

**Martino**

La hubiyay lana iiwaangeliyay- Diw. lamba. 5, bogga lamba. 82.

Hantidhowraha Guud: **O. Tam**

**KAALIMAHA SHAQAALAHA RAYIDKA SOOMAALIYA**  
**(Ku lifaaqan Dekereetada lamba. 153 ee 27 Nofembar 1954)**

---

**KAALIMAHA HAWLAHA MAAMULKA**

- I. — Kaalinta shaqaalaha hoggaaminta: waxaa ka mida shaqaalaha qaybta A, oo uxilsaaran in ay qabtaan xilalka hoggaaminta laamaha kala duwan ee Maamulka iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Agaasimaha Guud	darajada	2aad
Agaasimaha	“	3aad
La-taliye	“	4aad
Xoghayaha Koowaad	“	5aad
Xoghaya	“	6aad
Xoghaye Ku-xigeenka	“	7aad

- II. — Kaalinta shaqaalaha caawinta: waxay ka koobanyihiin shaqaalaha qaybta B, oo xilsaaran in ay la wadaagaan ahaqaalaha hoggaaminta, iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Sarkaalka Caawiyaha Sare	darajada	4aad
Sarkaalka caawiyaha dab. 1aad	“	5aad
Sarkaalka caawiyaha dab. 2aad	“	6aad
Sarkaalka caawiyaha dab. 3aad	“	7aad
Sarkaalka caawiyaha dab. 4aad	“	8aad
Sarkaalka caawiyaha dheeraadka	“	9aad

- III. — Kaalinta shaqaalaha amar fulinta: waxay ka koobanyihiin qaybta C; oo u xilsaaran in ay qabtaan mansabyada amar fulinta iyagoo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Karaaniga Sare	darajada	6aad
Karaaniga dab. koowaad	“	7aad
Karaaniga dab. 2aad	“	8aad

Karaaniga dab. 3aad	“	9aad
Karaaniga dab. 4aad	“	10aad
Ku-xigeenka karaaniga	“	11aad

#### **KAALINTA HAWLAHA GARSOORKA**

IV. — Kaalinta Garsoorayaasha: waxay ka koobanyihiin shaqaalaha u xilsaaran Maamulka garsoorka, waxayna leeyihiin manabyada iyo darajooyinka soo socda:

Garsooraha Koowaad ee Maxkamadda Sare	darajada	1aad
Garsooraha Maxkamadda Sare	“	2aad
Garsooraha Maxkammadda Racfaanka	“	3aad
Garsooraha Racfaanka	“	4aad
Garsooraha Kowaad Maxkamadda Gobolka	“	5aad
Garsooraha Maxkamadda Gobolka	“	6aad
Garsooraha Koowaad Max. Degmada	“	7aad
Garsooraha Dheeraadka	“	8aad
Ku-xigeenka Garsooraha	“	9aad

Dhammaan shaqaalaha kaalintaan waxaa u sugnaaday xuquuqda ama awoodda qaybta A.

V. — Kaalinta Kaaliyeyaasha iyo Gaarsiiyeyaasha waxay ku jiraan shaqaalaha qaybta C, oo u xilsaaranyihiin xaafiisyada garsoorka, iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Kaaliyaha Sare	darajada	6aad
Kaaliyaha dab. 1aad	“	7aad
Kaaliyaha dab. 2aad	“	8aad
Ku-xigeenka Kaaliyaha	“	9aad
Gaarsiiyaha Sare	“	10aad
Gaarsiiyaha	“	11aad

---

#### **KAALINTA HAWLAHA DUGSIYADA**

VI. — Kaalinta Barayaasha Sare waxay galayaan shaqaalaha qaybta A, oo xilsaaraan dugsiyada sare iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo soo socda:

Kormeeraha	darajada	3aad
Maamulaha	“	4aad
Baraha Sare dab. 1aad	“	5aad
Baraha Sare dab. 2aad	“	6aad
Baraha Sare dheeraadka	“	7aad

VII. — Kaalinta Barayaasha shahadada haysta: waxay soo galayaan shaqaalaha qaybta B, oo xilsaaraan dugsiyada hoose iyago leh mansabyada iyo darajoyinka soo socda:

Kormeeraha Dhexe	darajada	4aad
Kormeeraha Waxbarashada	“	5aad
Baraha Maamulaha	“	6aad
Baraha dab. 1aad	“	7aad
Baraha dab. 2aad	“	8aad
Baraha Dheeraadka	“	9aad

VIII. — Kaalita barayaasha caawiyeyaasha : waxay soo galayaan shaqaalaha qaybta C, waxayna u xilsaaranyihiin dugsiyada hose iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Caawiyaha Baraha Sare	Darajada	7aad
Caawiyaha Baraha dab. 1aad	“	8aad
Caawiyaha Baraha dar. 2aad	“	9aad
Caawiyaha Baraha dab. 3aad	“	10aad
Caawiyaha Baraha Dheeraadka	“	11aad

---

## KAALIMADA SHAQOYINKA FARSAMADA

### Hawlaha Canshuuraha

IX. — Kaalinta Canshuuraha: waxay soo galyaan shaqaalaha qaybta C, waxayna u xilsaaranyihiin hawlaha hubinta iyo qaadista canshuuraha, waxayna leeyihiin mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Wakiilka Canshuuraha Sare	darajada	6aad
Wakiilka Canshuuraha dab. 1aad	“	7aad

Wakiilka Canshuuraha dab. 2aad	“	8aad
Wakilka Canshuuraha dab. 3aad	“	9aad
Wakiilka Canshiiraha dab. 4aad	“	10aad
Ku-xigeenka Wakiilka Canshuuraha	“	11aad

### **Hawlaha Kastanka**

X. — Kaalimaha Saraakiisha Kastamada: waxay soo galayaan shaqaalaha qaybta C, waxayna u xilsaaranyuhiin hawlaha kastamada iyo leh mansabyada iyo xilalka soo socda:

Sarkaalka adaxa Kastanka	darajada	6aad
Sarkaalka Kastanka dab. 1aad	“	7aad
Sarkaalka Kastanka dab. 2aad	“	8aad
Sarkaalka Kastanka dab. 3aad	“	9aad
Sarkaalka Kastanka dab. 4aad	“	10aad
Sarkaalka Kastanka Dheeraadka	“	11aad

---

### **ADEEGGA HAWLAHA GUUD**

XI. — Kaalinta Injineerada waxay galayaan qaybta shaqaalaha A, waxayna u xilsaaranyihiin Hawlaha Guud, iyo leh mansabyada iyo darjooyinka soo socda:

Injineerka Kormeeraha	darajada	3aad
Injineerka Sare	“	4aad
Injineerka Koowaad	“	5aad
Injineerka	“	6aad
Injineerka Dheeraadka	“	7aad

XII. — Kaalinta Gometirada: waxay galayaan qaybta shaqaalaha B, waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada Hawlaha Guud iyago leh mansabyada iyo darajoinka soo socda:

Jometirka Madaxda ah	darajada	5aad
Jometirka dab 1aad	“	6aad
Jomitirka dab. 2aad	“	7aad

Jometirka dar. 3aad “ 8aad

Jometirka Dheeraadka “ 9aad

XIII. — Kaalinta caawiyeyaaha Hawlaha Guud waxay soo galayaa qaybta shaqaalaha C. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada Hawlaha Guud iygo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Caawiyaha Farsamyaaqanka Madaxda ah darajada 7aad

Caawiyaha Farsamyaaqanka dab. 1aad “ 8aad

Caawiyaha Farsamyaaqanka dab. 2aad “ 9aad

Caawiyaha Farsamyaaqanka dab. 3aad “ 10aad

Caawiyaha Farsamayaqaanka “ 11aad

#### **Adeegyada Boostada iyo Isgaarsiinta**

XIV. — Kaalinta Saraakiisha Boostada waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha C. waxayna u xilsaaranyihiin hawl-socodsiinta xaafiisyada boostada iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Madaxa Sarkalka Boostada darajada 6aad

Sarkaalka Boostada dar. 1aad “ 7aad

Sarkaalka Boostada dab. 2aad “ 8aad

Sarkaalka Boostada dar. 3aad “ 9aad

Sarkaalka Boostada dab. 4aad “ 10aad

Sarkaalka Boostada Dheeraadka “ 11aad

XV. — Kaalinta Raadyaha Taararka: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha C. waxayna u xilsaaranyihiin hawl socodsiinta xarumaha raadyayaasha taararka iyo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Madaxa Maglio F. R darajada 6aad

Ku-xigeenka Magia F. R “ 7aad

Farsamyaaqanka Raadyaha dab. 1aad “ 8aad

Farsamyaaqanka Raadyaha dab. 2aad “ 9aad

Farsamyaaqanka Raadyaha dab 3aad “ 10aad

Farsamyaaqanka Raadyaha Dheeraadka “ 11aad



## **Adeegyada Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha**

XVI. — Kaalinta Madaxda Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha A. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada beeraha iyo xannaanada xoolaha iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Kormeeraha Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha	darajada	3aad
Kormeeraha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 1aad	“	4aad
Kormeeraha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 2aad	“	5aad
Kormeeraha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 3aad	“	6aad
Ku-xigeenka Kormeeraha Beeraha Xannaanada Xoolaha	“	7aad

XVII. — Kaalinta khubarada Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha B. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada fulinta beeraha iyo xannaanada xoolaha iyo in ay la wadaagaan shaqaalaha madaxda iyo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda

Khabiirka Beeraha Xannaanada Sare	darajada	5aad
Khabiirka Beeraha Xannaanda Xoolaha dab 1aad	“	6aad
Kabiirka Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 2aad	“	7aad
Khabiirka Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 3aad	“	8aad
Khabiirka Beeraha Xannaanada Xoolaha Dheeraadka	“	9aad

XVIII. — Kaalinta Caawiyeyaasha Beeraha: waxay soo galayaan shaqaalaha qaybta C. iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Caawiyaha Beeraha Xannanada Xoolaha Sare	darajada	7aad
Caawiyaha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 1aad	“	8aad
Caawiyaha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 2aad	“	9aad
Caawiyaha Beeraha Xannaanada Xoolaha dab. 3aad	“	10aad
Caawiyaha Beeraha Xannaanada Xoolaha Dheeraadka	“	11aad

XIX. — Kaalinta kuwa Xannaanada Xoolaha: waxay soo galayaan shaqaalaha qaybta A. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada xannaanada xoolaha iyo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Kormeeraha Xannaanda Xoolaha	darajada	3aad
Dhatarka Xannaanada Xoolaha Sare	“	4aad

Dhaqtarka Xannaanada Xoolaha dab. 1aad	“	5aad
Dhaqtarka Xannaanada Xoolaha dab. 2aad	“	6aad
Dhaqtarka Xannaanada Xoolaha Dheeraadka	“	7aad

XX. — Kaalinta Caawiyeyaasha Xannaanada Xoolaha: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha C. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada xannaanada xoolaha iyo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Caawiyaha Xannaanada Xoolaha Sare	darajada	7aad
Caawiyaha Xannaanada Xoolaha dab. 1aad	“	8aad
Caawiyaha Xannaanda Xoolaha dab. 2aad	“	9aad
Caawiyaha Xannaanada Xoolaha dab. 3aad	“	10aad
Caawiyaha Xannaanada Xoolaha Layliga ah	“	11aad

#### **ADEEGYADA CAAFIMAADKA**

XXI. — Kaalinta dhaqaatiirta iyo khabarada kiimikada iyo farmashiyaha: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha A. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada caafimaadka iyago leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Kormeeraha Caafimaadka	darajada	3aad
Dhaqtarka agasimaha ah ama kiimikiistaha		
iyo farmashiistah	“	4aad
Dhaqtarka Madax Qaybta ama kiimi. farmashiistaha		
madaxa qaybta	darajada	5aad
Dhaqtarka kowaad ama kimikiistaha		
farmashiistaha koowaad	“	6aad
Dhaqtarka ama kiimikiistaha farmashiyaha	“	7aad

XXII. — Kaalinta Kalkaaliyeyaasha caafimaadka: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha B. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada caafimaadka iyagoo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Kalkaaliyaha Sare ee Caafimaadka	darajada	5aad
Kalkaaliyaha caafimaadka dab. 1aad	“	6aad
Kalkaaliyaha Caafimaadka dab. 2aad	“	7aad

Kalkaaliyaha Caafimaadka dab. 3aad “ 8aad

Kalkaaliyaha Caafimaadka Layliga “ 9aad

XXIII. — Kaalinta caawiyeyaasha caafimaadka ama bulshada iyo daaweeyeyaasha: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha uxilsaaran adeegga caafimaadka iyo bulshada iyo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Caawiyaha sare ee caafimaadka iyo bulshada darajada 7aad

Caawiyaha caafimaadka iyo bulshada dab. 1aad “ 8aad

Caawiyaha caafimaadka iyo bulshada dab. 2aad ama daaweyaha sare “ 9aad

Caawiyaha caafimaadka iyo bulshada dab. 3aad ama daaweeyaha dab. 1aad “ 10aad

Higsadaha Caawiyaha caafimaadka iyo bulshada ama daawweyaha dab. 2aad “ 11aad

Daaweyaha dab. 3aad “ 12aad

Daaweyaha dab. 4aad “ 13aad

Daaweeyaha Layliga “ 14aad

**Kaalkaaliso rajo leh “ 15aad**

Dhamaan shaqaalaha kaalintaan ku jira waxaa u sugnaaday xuquuqda qaybta C

XXIV. — Kaalinta Umulisoooyinka: waxay soo galayaan qaybta shaqaalaha C. waxayna u xilsaaranyihiin adeegyada umulisanimada iyagoo leh mansabyada iyo darajooyinka soo socda:

Umulisada Sare darajada 7aad

Umulisada dab 1aad “ 8aad

Umulisada dab. 2aad “ 9aad

Umulisada dab. 3aad “ 10aad

Umulisada Layliga “ 11aad

### **KAALINTA SHAQAALAHA HOOSE**

XXV. — kaalinta shaqaalaha hoose: waxaa soo galaya qaybta shaqaalaha D, oo xaafiis ama adeegka kasta shaqeyya iyo leh mansabyada iyo darooyinka soo socda:

Karaaniga Sare	darajada	9aad
Karaaniga koowaad	“	10aad
Karaani	“	11aad
Soo dhoweeye Sare	“	12aad
Soo dhoweeyaha koowaad	“	13aad
Soo dhoweeye	“	14aad
Kalkaaliye	“	15aad

Shaqaalaha kaalintaan ku jira, ka sokow xilalka ay hayaan, waxay loo xilsaari karaa adeegga dugsiyada, qaadista waraaqaha, telefoonada, qaadista boostada, adeegidda caafimaadka, albaab fure, ilaaliye, xafide iyo waxii la mida: xaaladahaaso kale shaqaalahaas waxaa loo xilsaari karaa hawlo kale.

Mogadisho, 17 Nofembar 1954.

Maamulaha

**Martino**